



PATIENT
EDUCATION

Tilmaamaha Jadwalka ee GI

Mgaca Bukaanka: _____

Dhakhtarka: _____

Taariikhda Baaritaanka: _____ Nooca Baaritaanka: _____

Xilliga Imaatinka: _____

Goobta Baaritaanka

- **CentraCare Sauk Centre – 320-352-2221**

Cinwaanka: 425 Elm Street North, Sauk Centre, MN 56378

Dhigashada Gaadiidka: Gaadiidka waxaa la dhigan karaa goobta gaadiidka la dhigto ee laga soo galo isbitaalka.

Is diiwaan gelinta: Fadlan imoow xafiiska xogheynta ee laga soo galo isbitaalka si lagu diiwan geliyo baaritaanka.

Su'aalaha Baaritaanka: 320-352-2221

Is diiwaan gelinta:

- Waxaa telefoon kuu soo diraya xafiiska diiwaan gelinta, si ay u dhameystiraan is diiwaan gelinta oo ay taas u dajajiso baaritaanka marka aad isbitaalka timaado.

Jadwalka

- Haddii aad ooneyso **in ka noqoto balanta, fadlan naga soo wac** 320-229-4933 oo dooro qabsashada balanta. Xafiiska balamada waxa uu furan yahay Isniinta ilaa Jimcaha 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo. Waxa kale oo aad soo wici kartaa telefoonka lacag la'aanta ah ee 1-800-835-6652.
- Haddii aadan ku imaan karin balanta, waxaanu kaa codsaneynaa in aan na soo wargeliso 48 saac ka hor.

Telefoonka balanta dhakhtarka ka horeeya

- Kalkaaliye caafimaad ayaa ku soo wacaya 5-7 cisho ka hor balanta baaritaanka. Waxa ay su'aalo kaa weydiinayaan waxyaabaha kaa caawin kara u diyaargarowga baaritaanka, kaala hadlaya caafimaadkaaga, oo kaa caawinaya in aad fahamto daawooyinka aad qaadan kartoiyo kuwa aadan qaadan karin ka hor iyo ka dib baaritaanka.
- Haddii aad WAX su'aal ka qabto tilmaamaha baaritaanka procedure, fadlan soo wax telefoon lambarada ku qoran goobta baaritaanka, Isniinta ilaa Jimcaha 8:00 aroornimo ilaa 4:30 galabnimo. Waxaa kale oo aad naga soo wici kartaa 1-844-795-1734,

Baaritaanka ka hor

- La xiriir ceymiskaaga si aad u hubiso in ay bixinayaan kharashka baaritaanka. Kala xiriir lambarka telefoonka ee dhinaca dambe ee kaarka ceymiska.

Macluumaadka wadaha gaariga

- Waa inuu kula socdaa wade gaari oo da'diisu tahay 18 ama ka weyn marka aad dhakhtarka timaado. Haddii aadan heysan wade gaari, waxaa suuro galin balanta dib loo dhigo.
- **Laguuma ogola** in aad gaarigaaga ku tagto gurigaaga. **Laguuma ogola** in aad gaari waddo, taksi ama bas qaadato ama xarunta caafimaadka kaligaa ka tagto.
- Taksi waad u qaadan kartaa guriga iyada oo **qof weyn oo mas'uul ah** kula socdo.
- Haddii aadan heli karin **qof gaariga kugu wada oo mas'uul ah** (qof qoyska ka tirsan ama saxiib) oo guriga ku geeya, baaritaanka waxaa la sameynayaa iyada oo aan lagu suuxin ama balanta dib loo dhigo.
- Waxaanu aad kuugu dhiiri gelineynaa in qof qeyb kula joogo 24ka saac ee xiga baaritaanka waayo daawada suuxinta ayaa saameyn ku leh jirkaaga, xusustaada, iyo guud ahaan in aad si fiican u gaarto go'aan wanaagsan.
- Laguuma ogola in aad shaqada ku noqoto, gaari waddo, ama makiinado ku shqeqeyso maalinta xigta baaritaanka. Ha cabin khamri hana saxiixin wax qoraal ah oo sharci ah 24ka saac ee xiga suuxdinta.
- Ka hor inta aadan ka tagin goobta baaritaanka, calaamadaha aasaaiga ah ee jirka waa ay ku dhow yihiin kuwo caadi ah.

Fariin/Tilmaamo gaar ah: